



# Cagaarshowga B

## Warqada xaqiiqda ee loogu talagalay waalidiinta

### Waa maxay cagaarshowga B?

Cagaarshowga waxaa loola jeedaa bararka/ caabuqa beerka. Waxaa jira fayrasyo badan oo kala duwan oo keena cagaarshow, cagaarshowga B wuxuu ka mid yahay kuwan.

### Waa maxay calaamadaha cagaarshowga B?

Dadka intooda badan weligood ma yeeshaan calaamadaha cagaarshowga B ee ba'an, laakiin haddii ay yeeshaan, calaamadaha waxay soo baxaan inta u dhaxaysa lix toddobaad iyo lix bilood kadib marka la qaadsiyo fayraska. Dadka qaangaarka ah qaarkood waxay dareemaan jirro gaaban oo u eg mida hargabka taas oo laga yaabo inaan loo aqoonsan ka cagaarshow B ahaan. Calaamado aad u daran sida matag, calool xanuun iyo maqaarka oo jaalle noqda ayaa lala kulmi karaa, waxayna u baahan doonaan inuu dhakhtar daweyyo. Marar dhif ah, infekshanka degdegga ah wuxuu keenaa jirro aad u daran oo keeni karta dhimasho.

### Cagaarshowga B ee joogtada ah iyo kan degdegga ah

Cagaarshowga B wuxuu sababi karaa jirro degdeg ah ama jirro joogto ah.

Jirrada degdega ahi waa midda sida dhakhsada ah looga raysto, badanaa toddobaadyo gudahood ama ugu badnaan dhawr bilood.

Inta badan dadka waaweyn waxay si buuxda uga boghsadaan cagaarshow B ee ba'an, caadi ahaan lix bilood gudahood.

Cagaarshowga B ee daba-dheeraada/ joogtada ah waa cagaarshow B oo socda in ka badan lix bilood. Dadka qaarkiis ee qaba cagaarshowga nooca B ee joogtada ah ayaa ah kuwo caafimaad qaba laakiin qiyastii afar meelood meal ka mid ah dadkaas ayaa ku dhici doona cudur beerka ah oo muddo dheer soconaya. Intooda badan waa la kala qaadaa waana in la sameeyaa taxadar si looga fogaado gudbinta/faafinta fayraska (ka eeg hoos).

### Sidee ku qaadaysaa Cagaarshowga B?

Dalkan, Yurubta iyo Waqooyiga Ameerika, cagaarshow B wuxuu inta badan ugu gudbaa qof-ka-qof iyada oo loo marayo galmo aan difaac laga gelin. Adduunka oo dhan, dadka intooda badan waxay qaadaan cagaarshow B marka ay taabtaan dhiigga qof qaba cudurka, gaar ahaan marka ilmaha ay dhalayso hooyo cudurka qabta isla markaana aan laga tallaalin dhalashada kadib.

### Galmada

Cagaarshowga B waxa lagu kala qaadaa galmo aan la iska difaacin oo lala yeesho qof qaba cudurka. Haddii aad ka welwelsan tahay inaad qabto cudurrada galmada lagu kala qaado, waxaad talo qarsoodi ah ka heli kartaa rugaha caafimaadka Galmada/ Daawaynta Xubnaha Taranka (GUM) ee ku taxan dhammaadka warqaddan.

## Dhiigga

Caddad yar oo dhiig ah oo ka yimaada qof qaba fayraska ayaa gudbin kara caabuqa haddii dhiigaas uu galo nidaamka dhiigga ee qof kale. Arrintani waxay dhici kartaa marka:

- La taabto boog, jeex ama xoq furan.
- La isticmaalo irbid ama qalab kale fiqan oo wasakhaysan. Dadka isku dura mukhaadaraadka oo wadaaga irbidaha la isku duro waxay ku jiraan khatar sareysa
- Qalabyada taatuu saarida, duleelinta maqaarka iyo toobida waxay noqon karaan kuwo khatar ah haddii aan la isticmaalin qalabka oo nadiif ah.
- Daawaynta ilkaha ee wadamada aan qalabyada si sax ah loo nadiifinayn.
- Dhammaan dhiigaga lagu bixiyo gudaha Boqortooyada Midowday (UK) hadda waxaa laga baarayaa cagaarshow B, laakiin baaritaanka kahor waxa suurtogal ahayd in cudurka uu u gudbo qofka haddii lagu duro dhiiga laga soo qaada qof qaba cudurka. Wadamada, aanan dhiiga lagu baarayn, isku shubitaanka dhiiga ayaa noqon karta wax sababa caabuqa.

## Hooyada oo u gudbisa ilmaha

Hooyooinka cudurka qaba waxay fayraska u gudbin karaan ilmahooda waqtiga dhalmada, laakiin tallaalida carruurtan marka ay dhashaan ayaa ka hortagaysa qaadista caabuqyada badankood.

## Sideen u ilaalin karaa dadka kale haddii aan qabo cagaarshow B?

- Ha isticmaalin caday, sakiin, maqas uu qof kale iska leeyahay ama alaab kale oo shakhsiyeed ama ha u oggolaan inay isticmaalaan alaabtaada shakhsiyeed.
- Haddii aad galmo samaysid, u sheeg lamaanahaaga (lammaanayaashaada) si aad u hubiso in isaga/iyada la tallaalay oo isticmaal galmo difaac leh adigoo isticmaalaya cinjirka galmada/kondhom.
- Si taxadar leh u nadiifi oo u dabool meelaha maqaarkaaga ka jeezan yahay, ka xoqan yahay iyo nabarrada furan adigoo isticmaalaya balastar aan biyuuhu geli karin.
- Sagxadaha iyo dhulka ka nadiifi wixii dhiig ah adigoo isticmaalaya biliji aan biyo/ dareere lagu darin.
- Ha ku deeqin dhiig ama shahwo ama ha isku diwaangelin xubin-bixiye ahaan.

## Daawaynta

Dad badan oo qaba cagaarshowga B ee degdeggaa ah uma baahna daaweyn sababtoo ah ma yeeshaan dhaawac beerka ah oo muddo dheer ah. Waxaa laga yaabaa inay dareemaan daal ka badan intii caadiga ahayd waxayna u baahan yihiin nasasho oo keliya. Baaritaan dhiig waa in la sameeyaa lix bilood kadib marka la ogaado qofka inuu qabo cudurka si loo hubiyo in fayraska ka baaba'ay iyo in kale. Ilaa laga gaarayo hubintan waa inaad raacdha talada ah inaad dadka kale ka ilaalso caabuqa.

Dadka qaba cagaarshowga B ee joogtada ah waa in si joogto ah uu u hubiyya khabir ku takhasusay cudurrada beerka si uu u hubiyo in dhaawac xagga beerka ah uu dhacayo iyo in kale. Hubintan waxay ku lug yeelan kartaa baaritaan loo yaqaan 'fibroscan'.

Dadka qaar ee qaba cagaarshow B ee joogtada ah aaya sidoo kale laga yaabaa inay ka faa'iidaystaan daawaynta loo isticmaalo daawooyinka fayraska.

**Tallaalka hargabka ee sannadlaha ah oo lala bixiyo tallaalka cagaarshow A iyo B, COVID-19 iyo caabuqyada ka yimaada fayraska "pneumococcus" ayaa lagu talinayaa.**

### Qoysaska iyo asxaabta

Lammaanayaasha isku galmooda, carruurta iyo xubnaha kale ee qoyska ee qofka qaba cagaarshow B ee degdeggaa ah ama joogtada ah waa in la tallaalaa. Qof kasta oo irbado la wadaaga waa in sidoo kale la tallaalaa. Waxay sidoo kale u baahan yihiin in la baaro si loo hubiyo inay hore u qabeen cagaarshowga B. Talooinka ku saabsan ilaalinta dadka aad isku dhowdiihin waxaad ka heli kartaa GP-gaaga.

Ma jirto khatar xagga caabuqa ah oo kaa imaanaysa u dhowaanshaha caadiga ah ee bulshada sidaa darteed booqdayaasha, asxaabta iyo dadka aad shaqa-wadaaga tiihin uma baahna tallaal qaadasho. Tusaale ahaan, caabuqa cagaarshowga B kama qaadi kartid gacmaha aad ku salaanto ama laabta oo aad geliso/habsiiso qof cudurka qaba, ama inaad ku fadhiisato kursiga musquusha. Maacuunta iyo alaabta cuntada ee uu isticmaalo qof qaba cagaarshowga B waxaa lagu dhaqi karaa biyo kulul oo saabuun leh ama waxaa lagu dhaqi karaa weelka alaab dhaqista sida caadiga ah. Wixii dhiig ah waa in isla markiiba la nadiifyaa sida kor lagu sharaxay.

### Tallaalka Cagaarshowga B

Tallaalka Cagaarshowga B waxa lagu daray jadwalka talaalka joogtada ah ee UK ee la siiyo carruurta laga soo bilaabo 2017.

Tallaalka waxaa loo bixiyaa saddex qiyaasood oo kala duwan ahaan. Marmarka qaarkood tallaalo xoojiyal ah oo dheeraad ah aaya loo baahan yahay in la qaato. Waa muhiim in la dhammeeyo qaadashada tallaalka. Baaritaan dhiig ayaa laga yaabaa in isku mar la qaado.

### Macluumaad iyo taageero

Haddii aad su'aalo qabto, waxaad la hadli kartaa Takhtarkaaga Guud ama kalkaaliyahaaga caafimaadka.

Rugaha caafimaadka galmeda/Caafimaadka Saxaaxa iyo kaadida (Genitourinary Medicine) (GUM) ayaa bixiya talo qarsoodi ah. Fadlan booqo  
[www.sexualhealthni.info/home](http://www.sexualhealthni.info/home)  
si aad u ogaato saacadaha iyo macluumaadka xiriirkha ee rugaha caafimaadka galmeda/GUM ee xaafaddaada.

Shabakadda Bukaanka ee la Maamulo ee Cagaarshowga B iyo C ee Waqooyiga Ayrland (Northern Ireland Hepatitis B and C Managed Clinical Network) ayaa macluumaad ka bixisa Cagaarshowga B iyo C.  
[www.hepbndcni.net](http://www.hepbndcni.net)

Kooxda Taageerada Beerka ee RVH (RVH Liver Support Group) ayaa taageero ugu deeqa dadka jooga Waqooyiga Ayrland ee la nool cudurka beerka waana koox madaxbannaan oo ku xiran Ururka Beerka Ingiriiska (British Liver Trust).  
[www.rvhliverversupportgroup.org](http://www.rvhliverversupportgroup.org)

Ururka Beerka Ingiriiska (British Liver Trust) ayaa macluumaad ka bixiya dhammaan noocyada cudurka beerka.

**Khadka caawimaada: 0800 652 7330 (10.00am-3.00pm, Isniin-Jimco)**  
[www.britishlivertrust.org.uk](http://www.britishlivertrust.org.uk)

Khubarada kalkaalinta caafimaad (hepatology)

Taleefanka: 07788 883457/07712 506350

Buugyarahan ayaa sidoo kale lagu heli karaa qaab PDF ah oo ku qoran luqado kale:

[www.publichealth.hscni.net](http://www.publichealth.hscni.net)



Find us on:



Public Health Agency (Hay'adda Caafmaadka Dadweynaha) 12-22 Linenhall Street, Belfast BT2 8BS.

Taleefanka: 0300 555 0114 (sicirka degaanka) . [www.publichealth.hscni.net](http://www.publichealth.hscni.net)